


Tix: GSH/11/13
Kalfadhiga: 4aad
Kulankiisa: 40aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

21 Juun 2014



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

**Ku Saabsan Soojeedinta Musharaxnimada
M.ne Dr. Cusmaan Maxamuud Maxamed “Dufle”
Lagu Maamuso Jaa’izada Nabudda ee Nobel**

BARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA	
XAFIISKA GUDDOOMIYAH	
GELID / RECEIVED	
TAR:	21/6/2014
TIX:	291
SIXIIX:	Shuute



GOLAHA SHACABKA SOMALIA:

MARKUU ARKAY in Musharrax kastoo buuxiya shuruudaha Jaa'izada Nobel loo magacaabi karo in lagu maamuso jaa'izada Nabadda ee Nobel.

MARKUU OGAADAY in Machadka Caalamiga ahe Giuseppe Pitre' ee Taliyaaniga uu mushurax ahaan magaca Mudane Dr. Cusmaan Maxamuud Maxamed Dufle, oo ah muwaaddin Soomaali ka mid ah Golaha Shacbiga Soomaaliya u gudbiyey Guddiga Norwejaanka u xilsaar Jaa'izada Nabadda ee Nobel

XOG OGAAL U AH in hawlaa aadaminimada uu Dr. Cusmaan Maxamuud Maxamed Dufle qabtay ay la mid yihiin hawlihii uu fuliyey Dr. Albert Schweitzer oo 1952kii dalka Gabon ee Galbeedka Afrika ka abaabulay kana hirgeliyey isbitaalka Albert Schweitzer awgeed lagu abaalmariyey Jaa'izada Nabadda ee Nobel.

KA WARQABA in Guddiga Caalamiga ah ee Laanjeerta Cas (Switzerland) shaqadii wacnayd ay bulshada u qabatay intii dagaalka socday awgeed lagu abaalmariyey Jaa'izada Nabadda ee Nobel 1944 shaqooyinkaas oo siyaabo badan u dhigma shaqa ahaanna ula ehel ah hawlaa Dr. Cusmaan Maxamuud Maxamed Dufle ka fuliyey Soomaaliya, Gaar ahaan hawlaa uu ka fuliyo Isbitaalka Kaaysaney.

HADABA ANAGA OO KU HADLEYNA MAGACA SHACBIGA SOOMAALIYEED WAXAAN SI QALBI FURAN USOO DHOWEYNEYNAA
soojeedinta Machadka Giuseppe Petre' u magaabeen Dr. Cusmaan Maxamuud Maxamed Dufle, waxaanna qaraarkan ku go'aansanay:

- 1. IN AAN MAHADCELINTEENA** u bandhigno Machadka halkan kore ku xusan, aqoonsiga uu Dr. Cusmaan Maxamuud Maxamed Dufle ku maamuuusay awgeed, tanoo sharaf weyn usoo jiiday Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo musharraxnimada uu xubin ka tirsan Golaha Shacbiga Soomaaliya u magacaabay in uu mudan yahay in lagu maamuso abaalmarinta maqaamkan sare.

2. **WAXAAN KU KALSOONAHAY** si kastoo ay natijada musharaxnimadu noqoto, in soo jeedinta uu sameeyey Machadka Caalamiga ah ee Giuseppe Pitre' waxay kor u qaaday kalsoonida umadda soomaaliyeed, oo ku fadhida jagadii ay dowga ugu lahayd bulshaweynta umadaha addunka.
3. **WAXAAN KU BAAQEYNA** in dhammaan shacbiga Soomaaliyeed ku hawlgalaan mabaadii'da badbaadinta banii aadamka, u huridda hawlahaa lagu daryeelayo aadaminimada iyo hadba kii taagdaran oo la taageero.
4. **WAXAAN U MAHADCELINEYNAA** dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo kuwa shisheeye oo naftooda u huray inay nolosha shacbiga samatobixiyaan, waxaanna ku dhiirigelineyna in ay sii wadaan jirista iyo joogteynta wacnaanta